IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Juunyo 1984 L. 6

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 Maajo 1984, Oggolaansho Meel marin Heshiis dhex maray BOG. J.D.S. iyo Bankiga horumarinta Afrika 385

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 20 ee 9 Maajo 1984, Meel marin heshiis am aaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika » 386

DECREE N. 20 on 9 May 1984. Instrument of ratification 387

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 21 ee 3 Maajo 1984, magacaabid Sarkaal loo wakiishay kharajka Miisaaniyadda Sannadka 1984.— » 388

XEER SHARCI L. 4 ee 18 Maajo Dib u ha beynta Sharciga L. 4 ee 13 Abriil 1983, kuna saabsan Joojinta Qaadka. » 389

XEER SHARCI L. 5 ee 18 Maajo 1984, Dambiyada Mukhaadaraadka. » 394

XEER SHARCI L. 6 ee 18 Maajo 1984, Baabi'inta Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. » 396

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.5.84, Lumid Jeeg War. L. 637807 ku qoran Maxamed Cabdi Cab/maan L. 148 » 398

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 22.5.84 Lumid B. K. L. 21551 ku qoran Saciida Weheliye Siyaad L. 152 » 399

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.5.84, Lumid Buug Keyd L. 8671 ku qoran Aasiya Shariif Maki L. 149 » 400

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 30.5.84, Lumid Buug Keyd L. 29181 ku qoran Macallin Axmed Max/med L. 150 » 401

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER 30.5.84 Lumid Jeeg War: L. 21245 ku Cali Ibraahim Maxamuud y51 » 402

SOMAL FRUIT — S.P.A. Saldhigga: Muqdisho — Ra'asumaalka Sh.So.1.000.000 » 403

SATIONAL BOTTLING COMPANY -S.P.A. Shirkad Saamiley ah — Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 3.600.000,- » 404

HORSEED — S.P.A. Shirkad Saamiley ah Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra' asumaal la wada bixiyey Sh.So.1.000.000 » 405

RUGTA GARGAARKA BEERAHA, Shir kad Saamiley ah. Saldhiggeedu tahay Muqdisho, Ra'ausaal la wada bixiyey Sh.So. 4.000.000, » 406

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONE AGRICOLE — S.I.P.A. Saldhiggeedu ya hay Shalambot J.D.Soomaaliya, Ra'au maalkeeduna yahay Sh.So.8.112.000, » 407

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.S.L. Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaalkeeduna yahay Sh. So.— 1.100.000, » 408

INDUSTRIA GARTARIE SOMALE — IN.C.A.S. — S.P.A. Shirkad Saamiley ah, Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh. So. 45.000.000, » 409

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 Maajo 1984. Oggolaansho meel marin Heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga

sh Meel marin Heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga
Horumarinta Afrika ee lagu daboolayay Kordhisiima da qiimaha Sarrifka qalaad iyo kordhisiimada qeyb ka mid ah Sarrifka gudaha ee Mashruuca Fidinta iyo Ta babarada hannaanka Maamulxa Beeraha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUGUU SOO SAARAYAA Sharciga Soo Socda

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiiska dhexmaray J.D.S. Iyo Bankiga Horumarinta Afrika ku na saabsan amaah Lacageed oo dhan U.A. 3.200.000 oo loogu tala galay Mashruuca Fidinta Beeraha.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday mgaalada Abdijan ee Dalka Ivory Cost, taariikhdu markay ahayd 24kii Maarso 1983.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan isa goo Lifaaq u ah.—

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiskan ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan. wu xuu leeyahay qiimo iyo astaan sharci la heer ah shar ciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintoo dda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo heshiiska.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S, waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuudiyadda.

Muqdisho. 9 Maarso 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 20 taariikh 9 Maajo 1984 meel marin heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika ee lagu daboolayay Kordhisiimada qiimaha Sarrifka qalaad iyo Kordhisiimda qeyb ka mid ah Sarrifka gudaha ee Mashruuca Fidinta iyo Tababarrada HannankA Maa mulka Beeraha.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad faqradda 5aad iyo qod. 82aad faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 20 taariikh 9.5.84 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.—

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka Soo Socda.

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika, he shiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada AbdiijAn ee Dalka Ivory Cost, taariikhdu markay ahayd 24kii Maarso 1983.—

Qodobka 2aad

Heshiiskaas wuxuu dalka J.D.S. ku yeelanayaa as taan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel marinta.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Mag. 1984.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

DECREE NO. 20 of 18 Maj 1984 Instrifioation.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of Somali Democratic Republic.

Having Seen: The law no 20 of on the 9.5.84 base of which the peole-s Assembly has approved the Agree ment specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.—

HEREBY PROMULGATES

ARTICLE I

The supplementary loan Agreement between the Government of the Simali Democratic Republic and the African Development Fund for financing the increase in the foreingn exchange cost and part of the increase in the local cost of the Agricultural Extension and farm Management Training project, signed in Abidjan on 24th march 1983, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of a law in the Territory of Somali Democratio Republic, and it!s implementation will effect upon the exchange of instru ment of Ratification.

ARTICLE III

This Decree shall come into force immediatly and will be published in the Official Bulletin.—

Mogadishu, 9 Mag. 1984

THE PRESIDENT OF S.D.R.
Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L.21 ee 3 Maajo 1984 Magacaabid Sarkcl loo wakiishay kharajka Miisaa niyadda Sannadka 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dekreetada sharciga ee soo baxay 29kii Disember 1961 Lr. 2 amarka maamulka Xi saabaadka.

ISAGOO ARKAY: P.D.R. 20 Maarso 1965 L.13 Xeer nidaaminta & Abaabulidda Guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriiray iyo wixii bedelaad gashay

MARKII LA GAREYSTAY: In loo baahan yahay Sar kaal Shaqaalle loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada J.D.S. iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee soo raaca Agaasimayaasha Guud Xafiis yada, iyo qeybaha Maamulka ee lagu tilmaamay Sharcigii Lr. ahaa 1 ee 4.1.68ii, iyadoo uu siinaya Awood Maamulidda qardeysiga ku tala gelidda Kharajka Shaqo socodsiinta iskuduwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la garaysan karo kuna saabsan qeredada (Soo hormarin) la sameeyo, Oggolaashada Ruqsadda Dhoofka Safarrada Dibed da iyo gunnadaba.

DEKEREETA

Sarkaalka la yiraahdo J/le Maxamed Jaaji Cabdi (Fartaag) Darajo A4.2 Agaasimaha Guud ee Maamul ka Lacagta MJDS, waxaa loo magacaabay Sarkaal wakiileed Kharajka Miisaaniyadda Sannadka ee Lacag ta MJDS, iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, laga bilaabo 1da Jannaayo 1984.

Dekereetadan waxay dhaqan geleysaa haddatan, islamarkaasna waxaa lagu soo saarayaa. Faafinta. Rasmiga ah.—

Waan Aaragnay ee Diiwaangelinnay.
Diiwaanka L. 1 bog. L. 21;
Muqdisho 5 Maajo 1984;
Hantidhowraha Guud;
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S.Gaas Maxamed Siyaad Badde

XEER-SHARCI lambar 4, taariikh 18 Mag. 1984:
Dib u habeynta Sharci lambar 4 ee 13ka Abriil 1983, kuna saabsan joojinta qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 4 ee 14ka Abrii le kuna saabsan joojinta qaadka iyo beddelaadya dii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Duruufaha iyo waayaha lala kulmay muddadii ka soo wareegtay dhaqan galka Sharciga joojinta qaadka;

MARKUU OGAADAY: In soo gelinta qaadka Dalka JDS iyo ganacsigiisa loo adeegsado tabo cusub oo abaabul qalab, hanti iyo dadba leh, ujeeddadoodu na tahay in la wiiqiyo himilada Ummadda iyo Dawladda Soomaaliyeed ee ka badbaadinta Bulshada dhibaatooyinka dhaqan, dhaqaale, akhlaaq iyo guud ahaan bulshadeed ee qaadku leeyahay;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in dib loogu laabto Sharciga joojinta qaadka, loona habeeyo qaab looga gudbi karo xakabyada ka soo baxay Sharcigii hore, isla markaasna looga hortegi karo xeeladaha iyo tabaha cusub ee la adeegsado;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda degdegga ah ee dib u habeyntani leedahay, sidaas darteedna ay lagama maarmaan noqotay in lagu soo saaro Xeer-Sharci;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharci ee soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa dib u habeyn lagu sameeyey Sharci lambar 4, soona baxay 13kii Abriile 1983, kuna saabsan joojin

ta qaadka, waxaana loo beddelay sida ku tilmaaman qodobbada soo socda:-

Qod. 2aad

Waxaa la xaaraantimeeyey in Dalka JDS qaad la ga soo geliyo, Dalka gudihiisa lagu beero, lagu haysto ama lagu cuno.

Qod. 3aad

Qof kasta oo qaad Dalka dibedda ka soo geliya, ama gacan ka geysta soo gelintiisa, ama ka ganacsada ama dullaal ka noqda ganacsigiisa, waxaa lagu ciqaa bayaa:

— 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali;
— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 100.000 ilaa 200.000 shilin Soomaali, haddii qofku dembiga noocaas ahi horey u galay.

Qod. 4aad

1. Gaadiidka loo isticmaalay soo gelinta qaadka Dalka JDS, ama lagu helo Dalka gudihiisa isagoo sida qaad, waa lala wareegayaa, qaadkana waa la gubayaa.

2. La wareegidda gaadiidka waxaa shardi u ah in Milkiilaha ama qofka uga wakiilka ah gaadiidka uu ula kac ugu soo qaaday qaadka

Qod. 5aad

1. Qof kasta oo guriga uu deggan yahay ama ma suulka ka yahay laga helo qaad ama lagu cuno waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali, haddii ay caddaato inuu ogaa qaad kaas, raallina ka noqday.

2. Qofka guriga deggan waxaa loola jeedaa qofka masuulka ka ah guriga markii dembigu dhacayey, og golaadayna in qaad lagu haysto ama lagu cuno, wuxuu na noqon karaa milkiilaha guriga, kireystaha, ama qof kasta oo si kasta masuul uga ah guriga.

3. Guriga waxaa loola jeedaa hoyga hurdada, mee laha ganacsiga ama meel kasta oo qof ama dad u gaar ah.

Qod. 6aad

1. Waxaa reebban in qaad Dalka gudihiisa lagu beero.

2. Qof kasta oo qaad ku beera Dalka gudihiisa ama kuwii horey ugu beernaa baabi'in waaya, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeeya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali, iyo qaad ka oo la gubo.

Qod. 7aad

Marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman Qod. 3aad ee Sharcigan, qof kasta oo lagu helo isagoo hays ta ama cunaya qaad, waxaa lagu ciqaabayaa:

— Hal ilaa 5 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali;

— 3 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 30.000 ilaa 100.000, haddii dembiiluhu yahay qof horey loogu xukumay dembi noocaas ah.

Qod. 8aad

Qofka xabsi lagu xukumo dembi qaad dartiis, had dii xukunku yahay kii ugu horreeyey, wuxuu ciqaabta xigga ah ku beddelan karaa mid lacageed, iyadoo ma alintiiba loo xisaabinayo 100 (boqol) shilin Soo maali.

Qod. 9aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta Shar cigan ee suuragal ka dhiga am afududeeya ama ku kaca fal ah in qaad la soo geliyo Dalka, laga ganacsa do, lagu beero, lagu haysto, lagu cuno ama si kastaba u gaba xilka ka saaran qabashada fal dembiyeedya daas, wuxuu muteysanayaa ciqaabta uu dhigayo qo dobka ku saabsan fal dembiyeedka uu qaban waayey.

Qod· 10aad

Xukunka ku dhaca, dembi qaad dartiis, Shaqaala ha Qaranka ee Reyidka ah iyo kuwa Ciidammada Qa labka Sida, wuxuu xukunsanaha u keenayaa:

— Xiriirka shaqo oo xaq la'aan go'a;
— Xuquuqda hawlgabka iyo liiltirka oo ka lunta·

Qod·11 aad

1· Lacagaha ka soo xerooda ganaaxyada iyo xabsi beddeleshada, boqolkiiba soddon (30%) waxaa loo bixi nayaa abaalgud, waxaana loo qaybinayaa sida soo so cota:

— Soo sheegayaasha 10%;
— Soo qabtayaasha 7%;
— Baarayaasha 3%;
— Shaqaalaha Maxkamadda dacwadda qaaday 5%;
— Sanduuqa Horumarinta Degmada 5%;

2· Soo sheegayaasha dembiga waa in qaybtiisa loo hormariyaa, lana siiyaa marka dembiilaha xukunku ku dhaco· Hormariska waxaa bixineysa Wasaaradda Maaliyadda·

3· Kooxaha kale, qaybaha ku soo aada waxay ka qaadanayaan lacagta soo xeroot·

4· Haddii soo-sheege uusan jirin, soo qabtaha ama soo qabtayaasha waxay yeelanayaan boqolkiiba (10%)·

Qod· 12aad

1· La dagaallanka iyo dabar goynta qaadka waa waajib saaran Dawladda iyo Dadweynaha Soomaali yeed·

2· Qaranku magdhow ka bixin maayo dhibaatada iyo khasaaraha la soo gudboonaada qofka isku daya ama is hortaaga Ciidan gudanaya waajibaadkiisa shar ciga ah ee ka hortagga iyo gacan ku dhigidda dambi yada qaadka·

Qod· 13aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada Sharci gan ku tilmaaman waxaa awood u leh Maxkamadda·

Badbaadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaa dada ee Gobolka.

Qod. 14aad

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjee da ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 15aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah JDS, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XETR-SHARCI Lam. 5 ee 18 Mag. 1984, Dembiyada Mukhaadaraadka:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la ad keeyo ciqaabta u dhigan dembiyada mukhaadaraadka;

MARKUU GAROWSADAY: Baahida loo qabo in la dabargooyo waxyaalaha maskaxda dooriya oo ad duunweynuhu u guntaday la dagaallankooda, waa jibna ay tahay in JDS ay qaaddo tallaabo kasta oo lagu xaqiijinayo dabargoyntooda;

MARKUU DHEGAYSTAY: Golah aWasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Xaaladaha Sharcigu bannaynayo marka laga reebo qof kasta oo sameeya, soo saara ama soo geliya dalka JDS, ama ka ganacsada, ama siiya (somministra) ama u keena qof kale waxyaabaha maskaxda dooriya (mukhaadaraad), waxa lagu ciqaabayaa 10 sano oo xarig ah iyo So.Shs. 50.000/= oo ganaax ah.

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa haddii waxyaabaha kor ku tilmaaman ee maskaxda dooriya laga iibiyo ama gacanta loo geliyo qof da'diisu ka yar tahay 18 sano, ama xagga maskaxda wax u dhiman yihiin ama qof ka mid ah dadka mukhaadaraadka isticmaalkiisa caadaystay.

Qod. 2aad

1. Qof kasta ee oggolaada isagoon ka qayb gelin falalka ku tilmaaman qodobka hore, in meel caam ah ama khaas ah ay ku kumaan dad ujeeddadoodu tahay in waxyaabaha maskaxda dooriya ay ku cunaan ama ku isticmaalaan, waxaa lagu ciqaabaaa 5 sano oo xarig ah iyo So. Shs. 25.000/= ganaax ah.

2. Qof kasta oo gala meelaha ku tilmaaman faqrad da hore ee qodobkan, si uu waxyaabaha maskaxda dooriya u isticmaalo, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano oo xarig ah iyo So.Shs. 20.000/= oo ganaax ah.

Qod. 3aad

Qaadista dacwadaha ciqaabta ee mukhaadaraadka waxaa lagu wareejiyey awoodda Maxkamadda Bad baadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada.

Qod. 4aad

Dacwadaha hor yaalla Maxkamadaha caadiga ah ee aan weli la qaadin iyo kuwa u rahman go'aanka, waxaa lagu soo wareejinayaa Maxkamadda Badbaada da ee deegaan ahaan awoodda u leh.

Qod. 5aad

Xukunsanayaasha dembiyada mukhaadaraadka ee rafcaanlayaasha ah waxay xaq u leeyihiin inay ka tanaasulaan rafcaankooda, haddii aan dacwaddooda xukun ama go'aan loo rahmin, waxayna dhammaysa nayaan ciqaabtii horey loogu xukumay.

Qod. 6aad

Dhanka ciqaabta, eedaysanayaasha u xiran ama loo haysto dembi ka mid ah dembiyada mukhaadaraad ka dhaqan galka Xeer-sharcigan ka hor, waxaa loo raa cayaa ciqaabaha ku tilmaaman Xeerka ciqaabta iyo shuruucda kale ee horey u jirtay.

Qod. 7aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana loo gudbi nayaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu rago.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Sharci lambar 6, taariikh 18 Mag 1984, Baabi'in ta Wakaaladda Horumarinta Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 5 ee 17ka Dishembar 1980, kuna saabsan dhismaha Wa kaaladda Horumarinta Ganacsiga iyo Faleenka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay habboon tahay in horumarinta tacabka iyo wax soo saarka faleenka iyo ganacsigiisa loo habeeyo iskaashatooyin ka kooban dadka sida tooska ah ugu hawlan tacab kaas;

MARKUU TIGELIYEY: In tallaabadaasi ay keeney so xijileydu in ay ku xirmaan goobaha faleenku ka baxo oo haatan xannaano darro darteed ay muuqa to in ay billaabatay in ay ka soo guriin;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in si ay aragtidaasu ku dhaqan gasho, la baabi'iyo Wakaaladda horey loogu dhisay horuma rinta iyo ganacsiga faleenka, hantideedana la wa reejiyo;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda degdegga ah ee arrintani leedahay, lagama maadmaanna loo arkay in hirgelinta go'aankan lagu soo saaro Xeer-sharci;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la baabi'iyey Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

Qod. 2aad

Hantida Wakaaladda waxaa lagu wareejinayaa

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaali yeed.

Qod. 3aad

Xijileyda waxaa loo abaabulayaa qaab iskaasha tooyin oo hoos yimaada Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaa shatooinka Soomaaliyeed.

Qod. 4aad

Waxaa la burriyey Sharciga tirsigiisu yahay 5 ee 17ka Dishember 1980 ee lagu dhisay Wakaaladda Horu marinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

Qod. 5aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynah aJDS, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.-

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. W. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 637807 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Baydhawo kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50,000 uu iska lahaa Maxamed Cabdi Cabdiraxmaan sida ku cad warqadda lambarkeedu 005428 taariikhdu 19.5.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Baydhawo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9,9,65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb, 637807 oo ku qoran Maxamed Cabdi Cabdiraxmaan ay na ku jirto Sh.So. 50,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Baydhawo u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wa reegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Saafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.5.84.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 151

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 21551 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 66.642 uu iska lahaa Saciida Weheliye Siyaad sida ku cad warqadda lambarkee yahay 01250 taariikhdeedu 21.5.84 ee Bankiga Gana

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 21551 oo ku qoran magaca Saciida Weheliye ayna ku jirto Sh.So. 66.642

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ko horaysa aan is hortag laga keenin

Muqdisho, 22.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 152

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 8671 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 56.000 uu iska lahaa Aasiya Shariif Maki sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0353. taariikhdeedu 13.5.84 Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Koowaad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 8671 oo ku qoran magaca Aasiya Shariif Maki ayna ku jirto Sh.So. 56.000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Koowaad u bedelo Buuga Keyd ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho. 14.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 153

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 20181 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliy d laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 2088 uu iska lahaa Macallin Axmed Maxamed sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 01332 taariikhdeedu 29.g.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 20181 oo ku qoran magaca Macalin Axmed Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 2.088

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin

Muqdisho, 30.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 154

MAXKAMADDA GOB· TOGDHEER BURCO

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob· Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwada ku saabsan J· Lumay·

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L/Burco Tr· 29.5·84·

HADDUU ARKAY: Qod, 65·DL·9.9·65 Lumid Jeeg war·ee Lam· 21245 kuna qoran tahay Sh·So· 100·000 kuna qoran Cali Ibraahim Maxamed lagana sameeyey Laanta Burco Tr· 11·4·84·

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas J/le Cabdulaahi Cumar Jaamac marka ay ka soo wareegto muddo 20 Casho ah laguna Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda·—

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeega Cusub ee la sameyndoono Gacanta laga saaro J/le Cabdulaahi Cumar Jaamac iyadoo la sugayo Mudada kor ku xusan·

Burco· 30·5·84.

MAXKAMADDA GOB· TOGDHEER
Yuusuf Xasan Cabdi

L· 155

SOMAL FRUIT — S.P.A. Saldhigga: Muqdisho, Ra'asù maalka Sh.So. 1.000.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda SOMAL FRUIT — S.P.A. wa xaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Muqdisho, maalinta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 9ka subaxni mo, haddii loo baahdo shirka waxaa mar labaad la qa ban doonaa 28ka Luulyo 1984, isla saacadda iyo mee sha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaa to arrimaha soo socda:

ARRIMAHA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista oo ku saabsan Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaaradda iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disem bar 1983 iyo go'aannada la xiriira.

2) Wax alla wixii kale oo falanqays uu baahdo. Waxaa Shirka ka soo qayb geli kara Saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

NATIONAL BOTTLING COMPANY — S.P.A. Shirkad Saamiley ah, Saldhiggeedu yahay Muqdisho Ra' asumaal la wada bixiyey Sh.So. 3.600.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda NATIONAL BOTTLING COMPANY — S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caa di ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Muq disho, kuna yaalla Jidka Leenin, saacadda 10ka subax nimo, maalinta 27ka Juunyo 1984, isu imaatinka Koo waad, haddii loo baahdo isu imaatin labaad, waxaa la qaban doonaa 12ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo mee sha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaaradda iyo Faa'iidada la xiray 31.12.1983 iyo go'aannada la xiriira.

3) Magacaabid Guddiga Maamulka iyo xaddidid tirada xubnaha Guddiga.

4) Magacaabid Guddiga Baarista.

5) Wax alla waxii falanqayn uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan, Saamiley da ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

HORSEED — S.P.A. Shirkad Saamiley ah, Saldhiggee du yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 1.000.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda HORSEED — S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Saldhigga Shirkadda, saacadda 5ta galabni mo ee maalinta 28ka Juunyo 1984, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa maalinta 28ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xu san, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaaraha iyo Faa'iidada oo la xiray 31.12.1983 iyo go'aannada la xiriira.

3) Ansaxidda ku biiridda Guddiga Maamulka OLI VETI Agostino oo beddelay FANTONI Silvano.

4) Beddelid hal Baare Rasmi ah.

Waxaa xaq u leh in ay ka soo qayb galaan Shirka Saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

RUGTA GARGAARKA BEERAHA, Shirkad Saamiley ah, Saldhiggeedu tahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 4.000.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda RUGTA GARGAARKA BEERAHA, S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Saldhigga Shirkad da maalinta 28ka Juunyo 1984 marka ay saacaddu ta hay 11ka subaxnimo, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa maalinta 28ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda;

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista ee Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disembar 1983 iyo go' aannada la xiriira.

2) Wax allaa waxii kale oo falanqayn u baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan, saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono fadhiga.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE S.I.P.A., Saldhiggeedu yahay Shalambot J. D. Soo maaliya, Ra'asumaalkeeduna yahay Sh.So.8.112.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOL) — S.I.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, maalinta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 12ka subaxnimo, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa 28ka Luulyo 1984, isla saacad iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna loo ga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista oo ku saabsan Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disembar 1983 iyo go'aannada la xiriira.

2) Ansaxidda ku biiridda Guddiga Maamulka OLIVETI Agostino oo beddelay FANTONI Silvano.

3) Wax alla waxii arrimo kale oo falanqayn uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan Saamileyda ku qoran Diiwaanka Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL— S.S.L., Saldhig geedu yahay Muqdisho, Ra'asumaalkeedana ya hay Sh.So. 1.100.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda BEER TACABKA LUUL — S.S.L. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Muqdisho, maalin ta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 5ta ga labnimo, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa 28ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista oo ku saabsan Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disembar 1983 iyo go'aannada la xiriira.

2) Ansixidda ku biiridda Guddiga Maamulka Oli veti Agostino oo beddelay Fantoni Silvano.

3) Wax alla waxii arrimo kale oo falanqays uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan, Saamileyda ku qoran Diiwaanka Saamileyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

INDUSTRIA GARTARIE SOMALE — IN.C.A.S., Shir kad Saamiley ah, Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 45.000.000.

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda INDUSTRIE CARTARIE SOMALE — IN.C.A.S. — S.P.A, waxaa la isugu yeera yaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Saldhigga Shir kadda ee Muqdisho, maalinta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 10ka subaxnimo; haddii loo baahdo Shirka mar labaad waxaa la qaban doonaa maalinta 28ka Luulyo 1984, isla saacadda iyo meesha kor ku xu san, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31.12.1983 iyo go'aannada la xiriira.

3) Wax alla waxii kale oo falanqays uu baahdo.

Waxaa Shirka xaq u leh in ay ka soo qayb galaan Shirkadleyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA